

# Filimka cimiladda > Cilmi baadhista

## cimiladda


Cilmi baadhista cimiladda waxaanu shaqo gelinaa aqoonta dhinacyo badan la gaar yeelay, tusaale ahaan aqoonta ku saabsan isbeddelada CO<sub>2</sub> waxa atmoosfeerku ka koobanyahay iyo kartida ay baddu ku soo nuugto CO<sub>2</sub>. Si loo helo guudmarka dhammayska tiran ee Guddida Isbeddelka Cimiladda U dhexaysa wadamada ee Qaramadda Midoobay IPCC (guddida cimiladda Qaramada midoobay) waxay ku soo ururisay aqoonta warbixino dhaa dheer, markaas siyaasiyiinta waxay haystaan aasaaska kaas oo ay ku go'aamiyaan siyaasada cimiladda. Hawsha xisaabinta sida isbeddelada cimiladdu u dhaqmi doonaan wakhti dhowr qarni ah, cilmi baadhayaasha cimiladdu waxay isticmaalaan qaababka cimiladda. Si kastaba ha ahaatee waxaa ku jiri kara asbaabo aan la hubin qaababka cimiladda, oo ay ka mid tahay cabbirtka kaarboonka mustaqbalka. Sidaas awgeed suuragal maaha in la sameeyo saadaalin buuxda oo sax ah oo cimiladda ah. Sideen ula dhaqanaa sababta hubaal la'aanta cilmi baadhida cimiladda? Ma isku halayn karnaa saadaasha ay sameeyeen cilmi baadhayaashu? Guddida cimiladda Qaramadda Midoobay had iyo jeer ma saxbaa?

## Waajibaadyada la dhammaystirayo ka hor inta aanad arag filimka

1. Maxaad ka taqaanaa guddida cimiladda ee Qaramadda Midoobay? Sideed ugu fekertaa cilmi baadhayaashu ku hubiyaan tayada dammaanadooda iyo shaqada kuwa kale ?
2. Cimiladda si balaadhan ayaa looga dooda saxaafadda. Muxuu yahay mowduuca qaarka ah ee hela dareenka badani?

## Waajibaadyada la xidhiidha filimka

1. Sanadii kun iyo sagaal boqol iyo kontomeeyaddii saynisyahan Maraykan ah, Charles David Keeling, waxa uu dhigay qalabka ka fiirsashada qiyaasta CO<sub>2</sub> gudaha atmoosfeerka, taaga buurta Mt. Mauna Loa ee ku taala Hawaii, meel ka fog wax ilo hawa wishikhow ah. Sababtee ayuu isaga ilaaliyay ilaha hawa wasikhowga, oo waa maxay natiijada ay qiyaastu muujisay?
2. Qiyaastu waxay muujisaa dhexda waxyaabaha kale in ay jiraan kala duwaansho xiliyeed oo wayn ka fekerka CO<sub>2</sub> gudaha atmoosfeerka, maxaad u malaynaysaa in ay sababaan kala duwanaanshahan?



3. Baddu ma ka qayb qaadan kartaa dhanka yaraynta CO<sub>2</sub> waxay ka koobantahay ee ku jira atmoosfeerka?
4. Sidee ayay guddida cimilada Qaramada Midoobay uga guul gaadhaa dammaanada tayada oo sidee ayay uga hadlaan waxa ku saabsan cilmi baadhida cimiladda dibad ahaan ?
5. Guddida cimiladda ee Qaramadda Midoobay waxay horumariyeen muuqaal sharaxaya habka ay dhici karto in bulshaddu ay ku horumarto. Sababtee ayay guddida cimiladda qaramadda middoobay u diyaariyeen dhowrkan muuqaal? Miyaanu mid uun ku filnayn?
6. Sababtee ayaynu ugu baahanahay muuqaal?
7. Waa maxay qaabka cimiladdu?
8. Sababtee ayay had iyo jeer u jirtaa hubaal la'aanta la xidhiidha xisaabinta qaababka cimiladda?
9. Warbixinta ka soo baxday guddida cimilada ee Qaramadda Midoobay waxaa la shaaciyay 2007. Iyaddoo lagu soo gebagabeeyay in qaybta wayn ee kululaanta cimiladda adduunka 50 sanadood ee u dambeeyay ay maangal ahaan sababeen aadamahu. Sababtee ayay tan u abuurtay faallooyin wargeesyada ah oo badan iyo dood kulul?
10. Guddida cimilada Qaramadda Midoobay waxa soo gaadhay cambaarayn ka dib markii la baahiyay warbixinta 2007. Maxay ahayd aasaaska cambaarayntu, oo ma waxay ahayd mid eexasho ah?

### Waajibaadyo la sii xoojiyay

1. Sababtee ayaa dooddaha, khilaafaadka iyo shaac bixintu ay muhiim ugu tahay cilmi baadhista cimiladda?
2. Sidee ayay cilmi baadhayaashu ugu shaqeeyaan in ay ku yareeyaan sababta aan la hubin ee qaabka cimiladda?

3. Maxaa uu erayga "aqoon aan la hubin" macnahiisu yahay? U isticmaal cimiladda tusaale ahaan.
4. Sharax iskaashiga caalamiga ah kaas oo ah aasaaska warbixinha cimiladda Qaramadda Midoobay.